Gillette Children's
Specialty Healthcare
200 University Ave. E
St. Paul, MN 55101
651-291-2848
800-719-4040
(telefoon bilaa lacag ah)
www.gillettechildrens.org

Ila soo xidhiidh

Su'aalo Degdeg ah Ama cabashooyin
Telefoonka caafimaad ee Kalkaalinta
651-229-3890

Su'aalo Kale Oo ku saabsan Daryeelkaaga
Rugta bukaanka St. Paul:
Khadka Wicitaanka Kalkaalisada
651-578-5000
Bukaanada jooga Goobaha Kale:
Kala xidhiidh lambarka Kooxdaada daryeel caafimaad Gillette.
Ballamo
651-290-8707

FEEJIGNAAN: Bukaan jiifka kuwaas oo jawaab celin ku leh walaxda afka laga qaato ama la isku marka raajada waa in ay u sheegeen dhakhaatiirta isla markaa.

Su'aalaha ama Walaacyada

La xidhiidh shaqaalaha dakhtarka daweeya hadalka iyo luqada xaga Gillette's St. Paul Campus: 651-291-2848 800-719-4040 (wiciyaan lacag la'aan ah).

Buugaag, DVD-yo iyo kabadan

Raadi qalabka ku saabsan

Naafada, xaaladaha caafimaad

Iyo taageerada daryeel bixiyaha.

Khayraadada caafimaad iyo Waxbarasho
dhismaha jaamacadda St. Paul, ee u dhaw dabaqa afaraad skyway
651-229-3938
hre@gillettechildrens.com

Daraasada Liqida (Videofluoroscopic) (VFSS)

Sidoo kalena loogu yeedo Modified Barium Swallow (oo qaab marka qofka raajo lagu sawirayo wax la liqsiiyo)

Videofluoroscopic Swallow Study (VFSS)
Also Called a Modified Barium Swallow | Somali

waxbarashada bukaanka
PTT062-SO

Waa maxay Daraasadda liqitaanka Videofluoroscopic?

Daraasada liqida Videofluoroscopic (VFSS) waa fiidyow baadhitaan raajo ah oo afka iyo hunguriga lagu sameeyo marka qofku wax cuno oo wax cabbo. Sidoo kale waxaa loogu yeedhaa baadhitaanka liqida raajada lagu sameeyo marka qofku wax cuno.

Sidee Baadhitaanka Loo Sameeya?

Ilmahaagu waxa uu ku fadhiistaa miiska quudinta ama kursiga dadka naafada ah. Waxaan siinaynaa ilmahaaga waxooga cunto isku jir ah milan ka kooban baariyam, taas oo naga caawisa in aanu si fudud u aragno dhaq dhaqaaqa cuntada ee sawirada raajada. Ku xidhan da'da ilmahaaga, cuntadda aanu siinaa waxay noqon kartaa dareere; cunto macmacaan ah ama adke jilicsan; ama adke adag. Dakhtarada raajadu (dhakhtarada ku takhasusay sawirada) iyo caawiyaha xirfad yaqaanka ku sheeqeeya raajooyinka (RPAs) ayaa sameeya VFSS waaxda Sawirida oo ay caawinayaan daweeyaha hadalka iyo luqadda iyo farsamo yaqaanada raajada.

Sabatee Ilmahaygu ugu Baahanyahay?

Waxaanu samaynaa VFSS si aanu u hubino dhibaatooyinka liqida kuwaas oo keeni kara dhibaato neefsashada ah, cunidda ama cabbida.

Sideen ugu Diyaariyaa Ilmahayga Baadhitaankan?

- Ilmahaagu waa in aanu ka boodin wax cuntooyin ah ka hor, laakiin waa in uu gaajoonayaa marka daraasadda.
- Ha ka boodin wax dawooyin jadwalaysan.
- Keen:
  - ❍ Tirooyin yar yar oo cunto/cabid oo Ilmahaagu u liqi karo si fudud oo diyaar u yahay
  - ❍ Tirooyin yar yar oo cunto/cabid oo ilmaha dhib baa ka haysata liqida
  - ❍ Waxooga cuntadda ilamahaaga dookhiisa ah
  - ❍ Wax cuntadda ilmahaagu yaqaan ama dookhiisa ah Qalabka quudinta, oo ay ku jirto qaadooyin, koob dheg leh Koobad, dhalooyin, iwm.

Muxuu u jiraa Baadhitaan Uur Suurta gal ahi?

Videofluoroscopy waxa uu isticmaalaa shucaac, sidaas darteed bukaan jiifka uur ka leh ama ama rummaysan in ay dhici karto uur waa in ay la hadashaa dhakhtarka intaan la bilaabin VFSS. Xog lala wadaago dhakhtarka waa qarsoodi. Ka sakow, waalidka ama daryeelayaasha uurka leh ama rumay in ay dhici karto uur waa in aanay joogin qolka marka baadhida.

Socda bogga xiga



Waxaanu samaynaa videofluoroscopic daraasaadka liqida waaxdayada sawirada. Marka ilmahaagu fadhiyo kursiga gaarka ah, kamarad fiidyowga raajada waxay raad raacdaa sida cuntaddu u dhaqaaqday jidhka dhexdiisa marka wax la cunayo ama la cabbayo.

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.

Maxaan Fili karaa inta lagu Jiro Baadhida?

Baadhitaanka laftiisa waxa uu qaataa in ka yar 15 miridh. Gebi ahaan Ballanku waxa uu qaataa 60 miridh.

- **La kulanka dhakharka daweeya hadalka iyo luqada (SLP)**
  SLP waxa uu waydiiyaa ilmahaaga dhibaatooyinka liqitaanka oo waxa uu ka jawaabaa su'aalahaga ku saabsan videofluoroscopy. SLP waxa uu la jooga ilma inta dhammaan lagu jiro ballanka.

- **Ahaanshaha meel**
  Marka sawirka, ilmahaagu waxa uu ku fadhiistaa kursi gaar ah. Waxaanu ku xidhnaa suunka kursiga dhexda badbaado ahaan. Markay suura gal tahay waxaanu saarnaa dabool xadidaad ah qaybaha jidhka aan u baahanayn baadhitaan. Habkayagu waxa uu ogolaadaa mid buuxa, sax ah oo baadhid ah marka ay gaadhayso shucaaca iyo inta uyar qofka bukaan jiifka ah.

- **Diyaarinta cuntadda iyo cabbitaanka**
  SLP waxa uu ku laaqaa walaxda baariyam cuntadda iyo dareeraha aanu siin doono ilmahaaga. Inta baadhitaanka lagu jiro, SLP waxa dhici karta in uu isku dayo dhowr nooc oo cunto ah iyo weelka quudinta, sida kooban, dhalooyin, qoriga sharaabka lagu nuugo ama siriij, si looga caawiyo ilmahaaga in uu liqo in badan si fudud.

- **Qaadashada Raajada**
  Markuu ilmahaagu wax cuno oo cabbo, raajiistahu ama RPA waxa uu duubaa cunidda iyo dhaq dhaqaaqa liqitaanka kamarad fiidyow gaar ah oo raajo. Kamaradu way soo dhowaataa – laakiin ma taabato—jidhka ilmahaaga. VFSS ma dhaawacdo.

Waa maxay Doorkayga Inta lagu jiro Baadhitaanka?

- Waxaanu ku dhiiri gelinaa waalidka ilmahaaga ama daryeel bixiyahaaga in ay ku jiraan qolka kale. Daaweeyaha quudinta bulshadda ee ilmahaaaga, sida SLP ama xirfad yaqaanka daweeyaha, sidoo kale waa lagu soo dhaweeyaa in uu ka soo qayb galo ballanka.
- Shayga muhiimka ahi ee aad samayn kartaa waa in aad ku caawiso ilmahaaga in uu degenaado. Si aad taa u yeesho, adiga laftaadu is deji.
- Si suuban uga hadal cuntadda iyo cabbitaanka marka lagu jiro baadhitaanka. Tani waxay dhiiri gelin doontaa in ilmahaagu wax ka cuno.

Maxaan ka Fili karaa Baadhida ka dib?

SLP waxay la kulmi doontaa ilmahaaga si ay u falnqeeyaan natiijooyinka VFSS oo u sharaxaan natiijooyinka talooyinkayaga. Tusaale ahaan, waxaanu ku talin karnaa adigu in aad la shaqaysid kooxda daryeelka caafimaad si ay u horumariyaan qorshaha quudinta.

Sideen u Daryeelaa Ilmahayga Ka dib VFSS?

- Ilmahaagu wuu ku noqon karaa hawlaha caadiga ah.
- Sii ilmahaaga dareere dheeraad ah si aad ugu caawiso bariyamku in ay u dhaafto si fudud.
- Bariyamku waxay ku keeni doontaa mindhicirka dhaqaaqyo cad maalin ama labba ka dib baadhida. Bukaan jiifka qaar sidoo kale waxay ku dhaca calool istaag (saxaro adag ama dhibtaato saxaroodka ah). Dawo degen oo caloolsha lagu socod siiyo ayaa caawin karta debcinta tan.
- Haddii calool istaagu uu sii socdo ama uu noqdo dhibaato, fadlan la xidhiidh dhakhtarka daryeelka muhiimka ah ee ilmahaaga.

Wixii xog dheeraada ah

Wixii xog dheeraada ah oo ku saabsan baadhitaanada sawirka Gillette, fadlan wac Advanced Imaging Center lambarka 651-229-3995.

Tilmaamo Gaar ah oo ka yimid Daaweeyahaaga

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.